

WAA MAXAY SeaTac Prop 1?

SeaTac Prop 1 waxay siisaa shaqaalaha safarka & martigelinta mushaharka cadaalada & ilaalin kale shaqada. Shaqaalaha Madaarka SEA-Airport & Magaalada SeaTac waxaa loo abaabulay ugu yaraan \$ 15 / saacadii - "Dagaalka 15". Waxay warqadda cod-bixinta ku riteen Hindisaha Shaqooyinka Fiican. Sannadkii 2013, codbixiyayaasha SeaTac ayaa ansaxiyey (Prop. 1), sidaasna sharci looga dhigo shaqaalaha dalabkooda! Sannadkii 2015, Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington waxay xukuntay in sharcigan uu khuseeyo shaqaalaha garoonka diyaaradaha ee SEA-Airport.

SHAQAALAHAA AYUU SHARCIGANI ILAALIYAA?

Shaqaalaha hoteelada hadaad u shaqeyso...

Hoteel leh:

- 100 qol ama ka badan
- 30 ama in ka badan shaqaale aan maareeyayaal ahayn

Adeeg cunto ama shirkad adeegga tafaariiqda ah oo ku dhex taalo hoteel, xarun dadweyne, maqaaci shirkadeed, xarun shirar ama xarun kulan lago qabto:

- 10 ama in ka badan shaqaale aan maamul ahayn

Kuma jiraan shaqooyinka diyaarinta cuntada loogu adeego diyaaradaha.

SHAQAALAHAA GAADIIDKA haddii aad u shaqeysid...

Loo shaqeeyaha gadiidka ee leh:

- 100 baabuur ama kabadan
- 10 qawaarida waaweyn
- 100 ama in kabadan oo dhigashada baarkinka ah
- 25 ama in ka badan shaqaale aan maamul ahayn

Kuma jiraan dadka ay shaqaaleysiiso shirkadda duulimaadyada ee adeegyada siiya shirkadda.

Tusaalooyinka Shaqooyinka Gaadiidka:

- **Adeegga macaamiisha** (jeegga dhinaca dejiska eh, adeegga macaamiisha ee gudaha garoonka diyaaradaha)
- **Adeegga rarka** (maaraynta boorsooinka, gawaarida boorsooyinka kirada, gelbinta juraasta curyaamiinta, maaraynta xamuulka)
- **Adeegyada nadiifinta diyaaradaha** (nadiifinta gudaha iyo debedda, nadiifinta qalabka taageerada dhulka, adeegyada diyaaradda biyaha / musqusha)
- **Adeegyada kale ee diyaaradda** (shidaalka, gaadiidka dhulka)
- **Adeegyada guud ee nadaafadda** (adeegyada daryeelka, dayactirka xarunta)
- **Adeegyada amniga**

WAA MAXAY XUQUUQAHA PROP 1 UU SIIYO SHAQAALAHAA?

Mushahar Sare

- Shaqaaluhu waxay marka hore u abaabuleen \$15 mushaharka ugu yar, sanad walbana way korortaa.
- **Sanadka 2020 waxa ugu yar ee lagu siin karaa waa \$16.34 saacadii.**

Mushaar bixinta jirada iyofasaxa amaanka ah

- Waxaad xaq u leedahay ilaa 6.5 maalmood oo fasax mushahar jirro iyo badbaado leh oo loogu talagalay shaqaalaha shaqeeyo waqti buuxa
- Uruurinta 1 saac 40 kii saacadood ee aad shaqayso
- Mushaharkaaga caadiga ah marka aad fasax qaadanayso
- Dhamaadka sanadka, waxaa lagu siinayaa lacag waqtiga aad kasbatay laakiin aadan isticmaalin.

Cadaalada bakhshiishada

- Bakhshiishada iyo khidmadaha adeegga waa in la siiyaa shaqaalaha fuliya adeegyada dhabta ah, oo ay ku jiraan:
 - 1) bakhshiidhada lago soo aruuriyaay diyaafadaha/martiqaad ama shirar cuntooyinka lakeeno
 - 2) talooyinka adeegga qolka
 - 3) kuwa caawinta qaadista boorsooyinka

Helitaanka shaqooyin deggan oo mushahar fiican qaata

- *Xulashada Saacadaha Dheeraadka ah iyo Dhiirrigelinta fursadaha waqtiga buuxa:* Waxay u baahan tahay loo-shaqeeyayaasha inay siiyaan saacado dheeri ah shaqaalaha nus ka hor intaanay shaqaalayn shaqaale waqti dhiman ah ama qandaraaslayaal ah.
- *Sii-haynta Shaqaalaha / Doorbidka Soo-Nooleynta:* Xaaladaha qaarkood, waxay u baahan tahay loo-shaqeeyayaasha inay marka hore shaqooyin siiyaan shaqaalihii ka soo shaqeeyay Madaarka SEA-Airportka iyagoo qabanaya shaqooyin la mid ah ka hor intaanay shaqaalaysiin shaqaale cusub

Ka ilaalinta aargudashada

- Loo-shaqeeyayaasha looma oggola inay tallaabo ka qaadaan qof shaqaale ah oo adeegsanaya xuquuqda u siinayo Prop !

Macluumaad dheeraad ah, tababarro Bilaash ah, iyo Kheyraad si dheer:

www.fairworkcenter.org/know-your-rights/sea-airport

FAIR WORK
CENTER

